



# COVID-19: U-guurista Kaalmada Kaabista Daryeelka Ilmaha

Gargaarka Waxbarashada Carruurnimada Hore iyo Daryeelka (Xidhmooyinka Gargaarka) ayaa la kordhiyay ilaa 12ka Julay 2020 si ay u sii wadaan adeegyada wax ku oolka ah iyo bixinta daryeelka qoysaska shaqaalaha muhiimka ah iyo carruurta nugul.

Kabista Daryeelka Caruurta (Child Care Subsidy CCS) iyo Kabista Dheeraadka ah ee Xanaanada Ilmaha (ACCS) waxay dib u bilaabaneysaa 13ka Julay 2020, oo ay weheliso dabcinta imtixaanka shaqada uu qofku qabto ee qoysaska iyo Lacag Bixinta Ku Meel Gaarka ah ee adeeg bixiyeyaasha. Tan macnaheedu waa in laga bilaabo 13ka Julay 2020, waalidiinta ayaa ku soo noqon doonaan in ay ku daraan lacag kabis ah khidmadaha daryeelka carruurta.

Qoysaska la yareeyay saacadahooda ay hawlo qabanayaan sababta oo ah COVID-19 waxay heli doonaan ilaa 100 saacadood oo ah xanaano caruur kabida labadii ilaa 4ta Oktoobar 2020. Si loo helo tan, qoysasku waa inay cusboonaysiiyaan heerarkooda hawl qabdnimo ee Service Australia. Tan waxaa lagu samayn karaa akoonkooda khadka tooska ah ee Centrelink oo loo ([Centrelink online account](#)) maro myGov ([myGov](#)) ama barnaamijka moobiilka ee Express Plus Centrelink ([Express Plus Centrelink mobile app](#)).

Intaa waxaa dheer, Bixinta Kala-guurka ayaa loo sameyn doonaa dhammaan bixiyeyaasha la oggolaaday ee helay CCS horaantii, oo ay ku jiraan adeegyadii ay maamusho dowlad-goboleed, degmo iyo dowlad-hoose.

Lacag bixinta Kala-guurka ayaa ah 25 boqolkiiba dakhliga khidmad bixiyaha ama xaddiga saacadiiba inta la saaro ee jira, hadba kii hooseeya, xilliga tixraaca la xidhiidha. Tani waa isla mudada tixraaca ee loo adeegsaday intii lagu jiray Xirmooyinka Gargaarka (labada wig ee kahor 2 Maarj 2020, iyo adeegyada bixiya daryeelka xanaanada fasaxa kaliya inta u dhaxaysa Waqtiga 3 iyo Term 4 ee 2019).

Bixinta Kala-guurka ayaa la sameyn doonaa muddada 13ka Julay 2020 illaa 27 Sebtembar 2020.

Si loo helo Lacag Bixinta Kala-guurka (Transition Payment), adeegyadu waa inay sii wadaan inay sii shaqaaleysiiyaan shaqaalaha shaqeynaya ama la siiyay JobKeeper dhamaadka Lacagta Gargaarka. Adeegyadu sidoo kale waa inay joogteeyaan isla fiiga adeega muddada tixraaca la xidhiidha (sida kor ku xusan).

JobKeeper waxay joogsan doontaa 20ka Julay 2020 shaqaalaha CCS ee adeegga loo oggolaaday iyo ganacsatada keliya ee ka shaqeysa adeegga daryeelka carruurta ama siinaya waxbarasho iyo daryeel bixiyeyaasha daryeelka carruurta.

Wixii macluumaad dheeri ah waxaad ka eegtaa Waaxda Xirfadaha Wasaaradda iyo Shaqada websaydhka [webpage](#) ama Waxbarashada Carruurnimada Hore iyo Daryeelka COVID-19 Su'aalaha Badanaa la Isweydiiyo [Frequently Asked Questions](#).

Waxa kale oo aad iska qori kartaa [subscribe](#) waxbarashada carurrta hore ee waaxda iyo wargayska eemlyka ah ee daryeelka.